



Lacag uu ku deeqay heesaa caan ah oo Barnaamijka Waqtiga Kala-guurka Bulshada ka caawin doona in ay dhisaan jiko

Ardayda ka tirsan Barnaamijka Waqtiga Kala-guurka Bulshada ee Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay baran doonaan xirfadaha cunto karinta, waxaa mahada qayb ahaan iska leh deeq laga helay heesaa caan ah.

Iyada la isticmaalayo deeqda lacageed oo dhan \$5,000 oo laga helay ururka Paul Simon, Simon & Garfunkel iyo sheekada caanka ah ee “Graceland”, oo ay la socoto \$5,000 oo laga helay [Ururka Bulshada Oregon](#), CTP waxay jiko dhammeystiran ku rakibi doontaa dhismaha ku yaala Koonfurta-bari ee Portland. CTP wuxuu u adeegaa ardayda dhigata waxbarashada gaarka ah ee dhammeysatay ugu yaraan afar sano oo ah fasallada dugsiya sare waxayna ka caawisaa in ay u gudbaan nolol caadi ah ka dib dugsiya sare.

“Waxaanu ka fikirnay in ay wanaagsan tahay in jiko wax lagu tababaro la dhigo halkan sababta oo ah kuwo badan oo ka mid ardaydeena ayaa raba in ay bartaan xirfadda cunto karinta,” ayay sheegtay Thelina O’Daniel, oo ah maamulaha CTP.

Lacagta dhan \$5,000 waxay qayb ka tahay deeq lacageed oo dhan \$10,000 oo PPS ka heshay Simon, oo ugu deeqay ururada degaanka ee goob kasta uu joosado safarkii uu tagay dunida oo dhan, oo uu ku jiray socdaalkiisii Xarunta Moda ee Portland kaasi oo dhacay Maajo 19. Qaybta kale kala bar waxay aaday Dugsiya Dhexe ee Lane, taasi oo dhismahaal dhowr ahi u dhexeeyaan CTP.

“Waan ku mahadinayaa Paul Simon deeqsinimadiisa,” ayuu sheegay Jonathan Garcia, oo ah Agaasimaha Sare ee Iskaashiyada Istaraatiijiga ah & Arrimaha Dibadda. “Maalgelintiisa dugsiyadeenu waxay faa’iido weyn u tahay ardaydeena dhigata CTP iyo Lane.”

Jikada ku taala CTP waxay ardayda u saamixi doontaa in ay bartaan xirfadaha cunto karinta, sida mindida gacanta loogu qabto iyo diyaarinta cuntada, iyaga oo kabaran doona Cunto kariye Bulshada ah, oo oggolaaday in uu bixiyo casharo yar. Naqshada jikada waxay waafaqsanaan doontaa Xeerka Naafada Maraykanka, iyada oo yeelan doonta meel wax lagu dhaqo iyo meel dhexe oo gooni ah oo la isku simi doono si ardayda wadata kuraasta curyaanka ‘wheelchairs’ loogu oggolaado in ay ku dul socon karaan.

Jikadu waxay ardayda u saamixi doontaa in ay isticmaalaan cunto ka soo baxday Goobta Dadka Xirfadda U Leh Wax Beerista ‘Green Thumb’ ee dugsiya, halkaasi oo ardaydu ku beeraan dhir kala duwan oo la gado sanadka oo dhan.

“Kuwo badan oo ka mid ah waxyaabaha la beerto ‘ingredients’ ee loo isticmaalo ismariska ‘sandwiches’ iyo saladhka waxay noqon doonaan kuwo degaanka ka baxa,” ayay sheegtay O’Daniel. “Waxay waxyaabaha la beerto ‘ingredients’ ka soo qaadi doonaan bannaanka iyaga oo keeni doona gudaha, dhaqina doona, farsameyn doona, ka dibna waxyaabahan la beerto ‘ingredients’ ee hadda uun la soo goostay u isticmaali doona ismariska ‘sandwiches’ iyo saladhka.”

Qiyaastii 50 arday ayaa isticmaali doona jikada, taasi oo la dhisi doono laga bilaabo bisha Janaayo iyada oo la dhammeystiri doono Maarso ama Abriil. Ardayda ka tirsan CTP waxay awoodi doontaa in ay sameeyaan ismariska ‘sandwiches’ bun iyo cunto kale, iyada oo la raacayo heshiiska ay la leeyihiin Lane, ay ka gadi doonaan isla markaana u geyn doonaan macallimiinta iyo shaqaalaha dugsiga.

“Wuxuu noqon doonaa mid fursado waaweyn u fura ardayda si ay u bartaan xirfadaha dhanka adeega macmiilka, bartaan xirfado fudud oo la dejiyay ka hor inta aynaan ku meelayn tababar shaqo oo lala leeyahay wada-hawlgalaha bulshada, ayay sheegtay O’Daniel. “Waa mid runtii xiiso leh.”